## 5-309 Doorashada Xakamaynta- Hubka Tamarta (CEWs)

(xx/xx/23)

Dib u eegis lagu sameeyay xeerarkii hore: (08/17/07) (10/01/10) (07/16/12) (10/07/13) (09/08/20) (12/22/20) (04/04/21) (01/01/23)

### I. Ujeedo

Ujeedada xeerkan waa in la ballaariyo shuruudaha xeerarka kale ee xoogga, gaar ahaan kuwa la xiriira CEW-yada.

### II. Qeexitaano

**Rididda:** Rididda maasada (CEW) waxay ka dhigan tahay marka aad ku howlanaanta riishadda kadib marka cirbadda maasada dhacdo, si koronto loogu dhaliyo fiilada. Ku rididda la beegsadaha macneheedu waa ku howlanaanta riishadda ayadoo bastoolada meesha lala beegsanayo lagu qabanayo ama ku howlanaanta riishadda kadib marka cirbadda maasada lagu rido la beegsadaha kaa fog

**Ku Qabashada:** Marka maaso (CEW) loo isticmaalo meesha aad ku taabanayso ama aad ku qabanyaso (ay ku jirto marka maasada (CEW) aad ku qabanayso la beegsadaha).

**Drive-Stun:** Waa marka maasada (CEW) xoog loogu qabto jirka la beegsadaha riishadana la hayo ayaadoon la siideyn maasada

**Probe Mode:** Waa marka Maasada (CEW) loo isticmaalo in lagu rido cirbadda maasada qofka ujeedo daciifnimo.

**Laser Painting:** La soo bixista, iyo kutaagidda maaso CEW qofka iyo dhaqaajinta aaladda higsanaysa leysarka. Xaaladaha qaarkood, tani waxay noqon kartaa wax ku ool ah helitaanka u hoggaansanaanta iyada oo aan dhab ahaantii la ridin maasada CEW.  Sidoo kale loo yaqaan 'goob cas'

**Touch/Contact Stun:** Samaynta habka stun ee taabashada/ku qabashada waa marka korantada maasada (CEW) ay oo gaarto jirka la beegsadaha, iyo riishadda ama batoonka riishadda waa la hawlgeliyaa iyada oo aan la sii dayn wax maarso ama cirbadda maasada. Gaarsiinta maasada (CEW) ka imaaneysa ee gaaraysa la beegsadaha ayaa dhamaystiraysa wareegga korantada kaas oo keena xanuunka laakiin ma keeno saameyn daciif ah.

**Digniinta Riishadda (Warning Arc):** Soo bixinta teesarka (CEW) iyo kicinta maasada ujeeddooyin hanjabaad isticmaalkeeda ka hor inta aan si dhab ah loo ridin ama drive-stun ama ku

taabasho/ku qabasho jirka ah. Digniinta riishadda waxaa loogu talagalay in loo isticmaalo sidii xeelad-dejinta si loo helo u hoggaansanaanta iyada oo aan lagu sii dayn aaladda la beegsadaha.

**Erayada lagu qeexay P&P 5-304:**

- Qaadis
- Geyn
- Ridista
- Muujin
- Ku howlan la beegsadaha
- Ku taagis
- Isticmaal

## III. Xeer

### A. Xeerka iyo Mabaadi'da Hagidda

Marka lagu daro u gaar ahaanshaha xeerkan, shaqaaluhu waa inay raacaan shuruudaha dhammaan xeerarka kale ee khuseeya, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn, Mabaadi'da Hagidda iyo heerarka kale ee P&P 5-301.

### B. Maasada (CEW) Sida Awoodda Sunta aan Dilaaga Ahayn

Maasada (CEW) ay MPD ansixisay (P&P 3-200) waa nooc awood oo aan dilaa ahayn laakiin waxa uu noqon karaa mid halis ah xaaladaha qaarkood.

### C. Maasada (CEW) Waaxdu Bixiso

Saraakiisha MPD waxa kaliya oo loo fasaxay inay qaadaan Maasada (CEW) ay bixiso waaxdu. Maasooyinka (CEW) shakhsi ahaan loo leeyahay, ama kuwa ay bixiso wakaalad kale, looma ogola in la qaado ama laga faa'iidaysto inta uu sarkaalka MPD ku dhaqmayo awoodooda rasmiga ah ee MPD.

### D. Tababar iyo shahaado ayaa loo baahan yahay

Saraakiisha MPD oo kaliya ayaa loo ansixiyay, qaadashada ama isticmaalka maasada (CEW) haddii ay si guul leh u dhammeeyeen tababar sannadeedka la ansixiyey ee maasada (CEW), oo ay ku jiraan qaybta imtixaannada, oo hadda shahaado la siiyay.

### E. Waafaqsan Xeerka iyo Tababarka

Saraakiishu waa inay u isticmaalaan oo kaliya CEW-yada si aan kala sooc lahayn (non-discriminatory), waana marka aw xooggaasi macquul yahay oo uu waafaqsanyahay tababarada MPD ee hadda jira iyo xeerarka MPD ee xukuma isticmaalka xoogga (oo ay ku jiraan dhammaan qaybaha P&P 5-300).

DRAFT

**F. Xaaladaha la Isticmaalayo**

1. La beegsade aan carareyn

Saraakiisha waa inay kaliya u isticmaalaan maasada (CEW) la beegsadayaasha **aan** baxsanayn marka:

a. Waxaa jirta sabab macquul ah oo lagu xirayo ama shaki macquul ah oo lagu hayo.

iyo

b. Xoog ayaa lagama maarmaan u ah in laga ilaaliyo sarkaalka, la beegsadaha, ama qolo kale waxyeello jireed oo si ula kac ah ugu dhow.

2. La beegsade cararaya

a. Saraakiisha waa inay kaliya u isticmaalaan maasada (CEW) la beegsadaha cararaya marka:

i. Sarkaalku uu hayo sabab macquul ah oo uu ku aamino in la beegsaduhu uu galay mid ka mid ah dembiyada soo socda:

- Xadgudub galmo oo ku lug leh isticmaalka ama hanjabaada isticmaalka hub khatar ah.
- Dil.
- Weerar heerka 1aad iyo 2aad.
- Dhac daran.
- Afduub.
- Hubka- Rididda hubka dambiyada, hubka tilmaamaya xadgudubka sharciga MN qaybta 609.66 Hubka halista ah.

ama

ii. Xooggan lagama maarmaan u yahay in laga ilaaliyo sarkaalka, la beegsadaha, ama qolo kale waxyeello jireed oo si ula kac ah ugu dhow.

b. Carar waligiis ma noqon doono sababta kaliya ee loogu isticmaalo maaso (CEW) qof.

3. Qodobada la beegsadaha

Saraakiishu waa in ay tixgeliyaan khatarta sii kordheysa ee dhaawaca iyo falcelinta xun ee bulshada ee u isticmaalka maasada (CEW) dadka qaarkood.

a. Saraakiishu **ma** isticmaali karaan maasada (CEW) ilaa xoog dilaa ah ay tahay doorashada kaliya ee kale marka sarkaal macquul ah uu ogaado in qofku uu yahay:

- Qof qaba xaaladaha wadnaha, oo ay ku jiraan qof leh qalab garaaca wadnaha ama qof dhibaato caafimaad ku haysato.
- Qof uur leh
- Qof waayeel ah.
- Ilmo ka yar 12 jir.
- Qof u muuqda inuu taag daran yahay, ama qof aad u dhuuban ama cufnaanta jirkiisu hooseeyo (ie, waxaa laga yaabaa inay leeyihin cirbad gidaaradiisu khafiif yihiin).

b. Saraakiishu waa inay awoodaan inay caddeeyaan sabab u dhiganta culayska saaran markay ka isticmaalayaan maasada (CEW):

- Ilmo 12 jir ah ama ka weyn.
- Qofka dhibaataysan (P&P 7-809).

4. Arrimaha xaalada

Saraakiishu maaha inay rideynin maasada (CEW)markay xaalado kujiraan marka ay si macquul ah u caddaato in rididda ay sababi karto dhaawac jidheed oo halis ah ilaa isticmaalka xoogga dilaaga ah aan si kale laga oggolaado. Xaaladahan oo kale waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn:

- Qofka saaran meel sare, oo laga yaabo inuu halis ugu jiro dhicitaan khatar ah.
- Qofka ku shaqeeya baabuurta ama mishiinada.
- Qofka mar horeba lagu xakameeyey katiinado mooyaane aan loo baahnayn si looga hortago inay dhaawac halis ah u geystaan naftiisa ama dadka kale iyo haddii isku dayo yar oo xakameyn ah ay noqdaan kuwo aan waxtar lahayn.
- Qofka laga yaabo inuu khatar ugu jiro qarqashada.
- Deegaannada ay ku jiraan uumiga guban kara iyo dareeraha ama walxaha kale ee guban kara.
- Qofka la kulmay MK-9 Pepper Fogger ama walxo kale oo kiimiko ah oo la mid ah ama walxo guban kara, sida shidaalka buufinta basbaaska alkoholka ka samaysan.
- Xaalado la mid ah oo ku lug leh khatarta dhaawaca daran ama dhimashada la beegsdaha.

## G. Isticmaalka Maasada (CEW)

1. Digniino

Saraakiishu waa in, ilaa aysan suurtogal ahayn in sidaas la sameeyo, ay bixiyaan digniino afka ah ama ay ku dhawaaqaan rabitaankooda ah in ay ridaan maasada (CEW) ka hor ridista dhabta ah. Isticmaalka tilmaamayaasha laysarka ee maasada (CEW) (dhibcaha gaduudan) ama riishadaynta maasada (CEW) waxay waxtar u yeelan kartaa faafinta xaalad ka hor inta aan si dhab ah loo ridin maasada (CEW).

2. Wareegyada (muddada maasada)

   Marka maasada (CEW) lagu ridayo la beegsadaha, shaqaaluhu waa in ay ku ridaan halka wareeg ee caadiga ah (wareegga caadiga ah waa shan ilbiriqsi) ka dibna waa in ay joojiyaan si ay u qiimeeyaan xaaladda si loo go'aamiyo haddii wareegyada xiga ay lagama maarmaan yihiin.

   a. Marka la go'aaminayo in ku samayn kasta oo dheeri ah uu yahay mid macquul ah, saraakiishu waa inay tixgeliyaan haddii qofku awood u leeyahay inuu u hoggaansamo oo la siiyo fursad macquul ah inuu u hoggaansamo ka hor inta aan la isticmaalin wareeg kale.

   b. Haddii wareegyada soo socda ay lagama maarmaan noqoto, saraakiishu waa inay xaddidaan tirada iyo muddada kaliya inta ugu yar ee lagama maarmaanka u ah in la xakameeyo ama inta la beegasadaha la xirayo ee xaaladaha jira.

   c. Saraakiishu waa inay si joogto ah u qiimeeyaan baahida hawl-qabadyo dheeraad ah kadib wareega maaso (CEW) kasta oo waa inay tixgeliyaan in soo-gaadhista ku samayn badan ee maaso (CEW) in ka badan 15 ilbiriqsi ay kordhin karto halista dhaawac ama dhimasho halis ah.

   d. Saraakiishu waa in aanay gaadhsiin in ka badan saddex wareeg oo maaso (CEW) ama 15 wadarta ilbiriqsi qofka inta lagu guda jiro hal shil oo kaliya ilaa xoog dilaa ah loo fasaxo, oo aanay jirin awood kale oo aan dilaa ahayn oo macquul ah.

   e. Saraakiishu waa inay ogaadaan in isbeddel la'aanta dabeecadda la beegsadaha ay inta badan muujinayso in wareegga korantada aan la dhamaystirin ama uu yahay mid kala go'a. Haddii ay jirto baahi loo qabo wareeg kale oo ku salaysan heerarka sare, saraakiishu waa inay isla markiiba ka ridaan maaso kale ama u gudubka doorashooyinka kale ee kantaroolka halkii ay ku qaban lahaayeen wareegyo aan waxtar lahayn oo sii socda.

3. Hal sarkaal markiiba

   Hal sarkaal oo keliya ayaa si ula kac ah u ridi kara maasada (CEW) ka dhanka ah la beegsadaha hal mar.

4. Habka ku qabashada maasada jirka (Drive stun)

   a. Maasada (CEW) guud ahaan waa in loo adeegsadaa habka ku ridista. Saraakiishu waa inay kaliya maasada (CEW) u adeegsadaan habka isku difaacidda ku qabashada maasada jirka, sida ka-hortagga si ay u kala saaraan saraakiisha iyo la beegsadaha si ay saraakiishu u tixgeliyaan ikhtiyaarrada kale ee xoogga.

   b. Saraakiishu waa inaysan u isticmaalin maasada (CEW) habka ku qabashada maasada jirka ee farsamada u hoggaansanaanta ee xanuunku keeno.

DRAFT

c. Maasaoyinka (CEW) si ula kac ah looguma qaban karo jirka sida madaxa,luqunta, laabta ama gumaarka la beegsadaha, ilaa isticmaalka xoogga dilaaga ah aan la caddayn.

d. Marka la isticmaalayo maasada CEW habka ku qabashada maasada jirka, saraakiishu waa inay sugaan wakhti macquul ah inta u dhaxaysa ku qabashooyinka si ay u qiimeeyaan waxtarka.

5. Habka ku ridista maasada meel jirka ka fog (Probe mode)

   a. Saraakiishu waa in ay bar-tilmaameedsadaan maasada (CEW) habka ku ridista maasada meel jirka ka fog ee cufka dhexe ee hoose.

   b. Maasooyinka (CEW) ku jira habka ku ridista maasada meel jirka ka fog waa inaan si ula kac ah loogu beegsan madaxa, luqunta, laabta ama gumaarka la beegsadaha, ilaa isticmaalka xoogga dilaaga ah aan la caddayn.

6. (CEW) waa inay ku jirtaa dhinaca tabarta daran

   (CEW) waa inay ku jirtaa dhinaca tabarta daran (taageerada) ee shaqaalaha MPD ee loo dhaariyey si looga fogaado in si lama filaan ah ula baxaan ama u ridaan hubkooda.

7. Isticmaalka kala duwan ee xoogga

   Isticmaal kasta (oo ku jira qaabka meel probe ama drive stunka) ama wareegga caadiga ah (shan ilbiriqsi) ee maasada (CEW) waa adeegsi gaar ah oo xoog ah oo ay saraakiishu si gaar ah u caddeeyaan si macquul ah.

**H. Isticmaal Xiliga Shaqada Kabaxsan**

1. Saraakiisha adeegsata naasooyinka ay MPD-da soo saartay inta lagu jiro baaxadda shaqada ee ka baxsan magaalada gudaheeda waa in ay raacaan xeerka MPD-da iyo habraacyada ka warbixinta isticmaalka xoogga iyo soo dejinta qalabkooda.

2. Haddi saraakiishu ay wataan maasada ay MPD-da soo saartay inta lagu guda jiro baaxada shaqo ee ka baxsan magaalada (tusaale, u shaqaynta wakaalad kale oo sharci fulin) wakaaladaasi waa in ay saxeexaan ka dhaafid (warqad heshiis ah oo shaqo ka baxsan) taas oo tilmaamaysa in shahaado loo marayo Waaxda Booliiska Minneapolis ayaa ku filan in la isticmaalo marka aw u shaqaynaynayo hay'addaas.

**I. waayidda ama Halawga** (Loss or Damage)

Maasooyinka lumay, halaaway ama aan shaqayn waa in lagu wargeliyaa Isku-duwaha maasada (CEW) isla markaaba marka la ogaado xaaladda waayitaanka, halawga ama uusan shaqaynayn.

**J. Soo dejinta iyo ka warbixinta**

1. Soo dejinta tilmaamaha maasada (CEW)

   a. Maasada (CEW) waa in la soo dejiyo, marka loo isticmaalo habka probe, touch/contact stun mode ama drive-stun ka hor dhamaadka xilliga shaqada sarkaalka.

   b. Maasada (CEW) waa in loo soo dejiyaa dhacdo kasta oo la diiwaan geliyo oo uu sarkaalku aaminsan yahay in ay leedahay qiimo caddayn ah.

   c. Haddii maasada (CEW) la isticmaalay markii ay dhacday dhacdo halis ah, maasada (CEW) waxa soo hindisay hay'adda baadhista si ay u habayso caddaymaha xogta iyo muuqaalka.

2. Tilmaamaha warbixinta maasada (CEW):

   a. Marka maasada (CEW) la rido ama lagu qabto habka touch/contact stun ama drive-stun la beegsadaha, sarkaalku waa inuu ka warbixiyaa isticmaalkiisa si waafaqsan shuruudaha Warbixinta Xoogga ee P&P 5-302. Saraakiishu waa inay ku qoraan isku dayga nabad hoos u dhigista Qoraalkooda Sheeko.

   b. Marka maasada (CEW) lagu hanjabo muujinta, dhibco guduudan ama riishadaynta, isticmaalka khatarta ah waa in lagu wargeliyaa si waafaqsan P&P 5-302.

   c. Marka maasada (CEW) la isticmaalo inta lagu guda jiro baaxadda shaqo ka baxsan magaalada (tusaale hay'ad kale oo sharci fulin) saraakiishu waa in ay Minneapolis CCN ka helaan MECC oo ay dhamaystiraan Warbixinta Bilayska ee ciwaankeedu yahay AOA oo ay tixraacaan warbixinta shilka shaqabixiyaha dibadda ee Qoraal Sheeko. Saraakiishu waa inay soo dejiyaan qalabka oo ay ku kaydiyaan macluumaadka hoos yimaada Minneapolis CCN.

**K. Daawaynta iyo Gargaarka Caafimaadka**

Marka lagu daro daaweynta caadiga ah ka dib isticmaalka xoogga (sida waafaqsan P&P 5-301), daawaynta soo-gaadhista ka dib ee qofka ay korontadu ka soo gaadhay maasada (CEW) waa in ay ku jiraan kuwan soo socda:

1. ka saarista cirbadda

   a. Cirbadaha maasada (CEW) waa in kaliya ay ka saaraan shaqaalaha caafimaadka ee ku habboon haddii ay ka mudaan meel xasaasi ah (wejiga, qoorta, gumaarka ama aagagga naaska).

   b. Saraakiishu waxa ay meesha ka saari karaan cirbada maasada (CEW) kaliya haddii dhammaan shuruudahan soo socda la buuxiyo, haddii kale cirbadda waxaa meesha ka saaraya shaqaalaha caafimaadka ee ku habboon:

- Sarkaalka ayaa qiimeeyay qofka wuxuuna go'aamiyay in aysan jirin calaamado muujinaya saameyn joogto ah oo maasada ka yimid.
- Sarkaalku waxa uu xidhan yahay galoofyada difaaca waxa uuna haystaa qalab caafimaad oo ku filan oo ay ku jiraan faashado iyo masaxaha aalkolada.
- Cirbad ayaa laga saarayaa iyadoo uu joogo sarkaal labaad.
- Sarkaalku waxa uu helay tababar ugu yaraan sanadle ah oo ku saabsan saamaynta caafimaad ee isticmaalka maasada, hababka looga saaro cirbadda xanuunka oo xaddidan, iyo xakamaynta caabuqa.

c. Haddi ay meesha ka saarayaan cirbadda, saraakiishu waa in ay sugaan cirbadaha (biohazard (khaatarka nool) "afleyda") hoos ugu jeediyaan kartoonka la bixiyey oo ku xiraa dabool badbaado ah.

2. Kormeer goobaha saameynta

a. Marka ay habboon tahay, muuqaal ahaan u baar goobaha cirbaddu gashay ama lagu muday ee calaamadaha dhaawaca.

b. Marka ay habboon tahay, sawir goobaha cirbaddu gashay ama goobaha lagu muday.

3. Sii wad la socodka

Shaqaalaha la dhaariyey waa inay si joogto ah ula socdaan xaaladda caafimaad ee qofka korontadu ka soo gaadhay maasada (CEW) ilaa lagu wareejiyo shaqaalaha caafimaadka ama kuwa kale ee sharci fulinta.

DRAFT